

SHIRKAD SAHLAN OO DHISMO AH(SOCIETA SEMPLICE), OO LAGU

N14729R-2

MAGACAABO "SHIRKADDA DHISMAHA" S E C C O", SALDHIGGEE-

DUNA YAHAY MUQDISHO, DEGMADA C/CASIIS, HANTIDERDUNA

TAHAY LACAG DHAN SH. SO. 150.000/- (BOQOL & KONTON KUN),

JAMHUURIYADDA DIMOQORAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA GARSOORKA IYO ARRIMAHA DIINTA



XAFIISKA NOTAAYAHA MUQDISHO

Maamta oo ah 6da Bisha Janayo 1985, Xafiiska Notaayaha Muqdisho, oo ku yaalla Waddada Rooma, aniga oo ah Notaayo Xamar, waxaa iigu yimid Jaallayaasha hoos ku qoran oo kala ah: - - - - -

- 1)- Inj. CAYDARUUS CISMAAN KEENADID oo ku dhashay Hobyo 1947, deggan Xamar, Soomaali, leh Pass. N. 289215 ee Xamar;
- 2)- HANI ABDULLAHI JAMAC oo ku dhalatay Xamar 1952, Deggan Xamar, Soomaali ah; - - - - -

Dadkaas aan kor ku soo sheegay, aniga oo aqoonsaday, ayaga oo ka tanasulay kaalmo marqaatiyeed, aniguna aan ku waafaqay, waxay i weydiisteen inaan u qoro He-shiiskaan ay iigu caddeeyeen inta soo socota oo ah: -

- 1)- Inay dhexdooda ka dhisteen Shirkad Sahlan (Societa Semplice), oo lagu magacaabo " SHIRKADDA DHISMAHA SECCO, oo Saldhiggeedu yahay Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis,
- 2)- In Hantida Shirkadda ay ka dhigteen lacagta ah Sh. - So. 150.000/- (boqol & konton kun shilin), oo Shirkadleydaas ugu kala qaybsan qaybo isla, eg. - - - - -

Lagu diiwaangashay Muqdisho

L. 55 - go'aan

Lacag dhan Sh. So.

Wakiilka Saxiixay

9/1/85

Abd. Samir

.....b.....

Inj. CAYDARUUB CISMALAN KEENADID , Qayb ah Sh. So. 75.000/-

HANI CABDULLAAHI JAAMAC Qayb ah Sh. So. 75.000/-

3)-In Muddada ay Shirkaddu socon doonto ay ka dhigteen konton(50)Sano, oo laga bilaabo maalinta la soo canshuuro qoraalka Shirkaddaan, hase yeeshee muddadaas ka hor ayaa Shirkadda la baabi, in karaa, haddii kalese muddadaasi marki ay dhammaato ayaa muddo kale loo sii cusbooneysiin karaa, hadba sida Shirkadleyda Shirkaddaan dhisatay ay go, aan ku gaaraan. - - - - -

4)-In Ujeeddada Shirkaddu tahay dhisidda Guryaha Daaraha oo nooc kastaba leh iyo kuwa caadiga ah ee Dadku u badan yahay oo dhan. - - - - -

5)-In Maamulka Shirkaddaas lagu magacaabo "Shirkadda Dhisaha S.E.C.C.O" loo dhiibay Hal Maamule Idman ee laga dhexdoortay Shirkadleyda Shirkaddaan dhisatay. - - -

6)-In hadda Maamulka Shirkaddaas " S E C C O " lagu magacaabay laguna dhisay Jaallaha hoos ku qoran oo ah:-

Inj. CAYDARUUB CISMALAN KEENADIID MAAMULE IDMAN,

Maamulaha Idman wuxuu caddeeyey inuu xilkiisa si fiican oo habsami leh ugu soo baxaayo. - - - - -

In Maamulaha Idman uu awood buuxda u leeyahay inuu fuliyo, wax kastoo la xariira danaha Shirkadda, Heshiisyana la geli karo Cid kasta oo dani ka soo gasha, asagoo fulinaya Maamulka Caadiga & Wax kaan Caadiga ahaynba, Benkiyada lacag ku shubi kara, kana soo qaadi kara, -

.../.....

Handwritten notes in blue ink on the left margin, including a signature and the date 28/11/2012.

aan aniga Notaayaha ahu aan aaminka kuqabo, waxaan
- u aqriyey Jaallayaashaas, waxayna ii caddeeyeen inay
- u qoran tahay siday rabeen, waana ila wada saxiixeen.

1)- *fuus*

2)- *Haw cabdulkahi gonaal*



NOTAAYAHADA

(Dr. MUUSE XUSEEN SADIQ)

Mu

Handwritten notes on the left margin:
19/11/09
15584
Handwritten signature/initials

22